PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
prepared & empowered

Dugsiyada Dadweynaha ee Portland
Heshiiska Waalidka ee Helitaanka Furaha Internetka Dugsiga

Internetka iyo goobaha shabakadaha internetka ee la xafiday ayaa wax weyn ka badalay sida loo helo, loo tabiyo, loona wareejiyo xogta qarsoodiga ah. Isbaddaladani waxay wax ka baddaleen duruusta iyo sida ardayda wax loo baro. . Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay taageerayaan in ardayda , waalidka, macallimiinta iyo maamulka dugsiyadu la soocdaan warbixinta ardayga, taasoo kor u qaadi kartaa ka faa'iideysiga ardayga ee fursadaha waxbarasho , isla markaana sare u qaadi karta xiriirka ardayga, waalidka iyo macallimiinta. Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waxay warbixinta ardayda ku xafidaan hab elektaroonik ah (aan warqad ahayn), waxayna warbixinta waxbarasho ee ardayga u ogolaanayaan waalidka xaqa u leh inay arkaan oo kaliya iyadoo la isticmaalayo nidaam si adag loo xafiday. Dhamaan waalidka waxay ku dhaqmayaan xeerarka isticmaalka internet-ka iyo dhamaan habraaca teknoolojiga iyo xeerarka la xiriira, iyo dhamaan xeerarka maamulka waxbarashada degmada ee khuseeya arrintan.

A) Xuquuqda iyo Waajibaadka

Furahani waa adeeg bilaash ah oo loogu tala galay waalidka iyo ardayda dhigata Dugsiyada Portland. In ardayga waxbarashadiisa internetka laga fiiriyaa waa arrin lagugu xurmeeyey mana aha wax waajib naloogu leeyahay. Waalidka waxa kaliya oo.loo ogolaan doonaa inuu xogtan helo haddii qoyska arday u dhigto. Marka ardaygu ka tago waxbarashada ama uu ka qalin jabiyo waa la xiri doonaa xiriirkan. Waalidka, ardayda iyo shaqaaluhu waa inay fahmaan isla markaana ay si xilkasnimo ah u isticmaalaan.

B) Warbixin Sugnaan Xilkasnimo

In la helo war sugan waa mas'uuliyad u dhaxaysa dugsiyada, waalidka iyo ardayda. Dugsigu wuxuu ku dadaali doonaa in la helo war sugan oo dhamays tiran. Haddii uu waalidku arko wax aan sugnayn waa inay si degdeg ah dugsigooda ula socodsiiyaan isla markaana ay muujiyaan waxa khaladka ah.

C) Xogta la Heli karo

Dugsiyada Portland waxay xaq u leeyihiin inay wax ku kordhiyaan, wax ka badalaan ama ay tirtiraan qoraalada ku jira internetka marka ay doonaan iyagoon ogeysiis bixin, kuwaasoo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku koobnayn, qaybaha hoos ku qoran.

Imaatinka (Xaadiritaan ka dugsiga)
Jadwalka
Imtixaanada
Warbixinaha
Shaqooyinka fasalka loo diro (Dugsiyada Sare iyo Dhexe)
Infinite Campus Foomka codsiga helitaanka furaha waalidka *("Parent/Guardian Portal Access Request Form")*

D) Foomka Codsiga Furaha Waalidka *("Parent/Guardian Portal Access Request Form")*

Waalid kastaa waa inuu buuxiyaa oo uu saxeexaa foomka *Parent/Guardian Portal Access Request Form* intaan loo ogoalaan inuu helo fure (fiiri warqadda ku lifaaqan)

E) Isticmaalka Adeegan

Waalidka waxa looga baahan yahay inay ku dhaqmaan arrimahan soo socda:
Waalidku waxay u dhaqmi doonaan si xilkasnimo, dhaqan wanaaga ah, sharcigana ku haboon.
Waalidku waa inayna isku dayin in networka dugsiga iyo ka degmada ama xogta ku jirta ayna waxyeello u geysan.
Waalidku waa inayna isku dayin inay galaan goob qof kale loogu talagaley.

Waalidku waa inayna u isticmaalin boggan internet-ka wax sharci darro ah, taasoo ay ka mid tahay in aan la jabin xeerarka dowladda dhexe iyo kuwa gobolka ee qarsoonaanta xogta. Qofkii lagu ogaado inuu xeerarkaas ku xadgudbay waxa lagu qaadi doonaa ciqaab danbi iyo/ama mid madani ah.
Waalidka ku arka khatar ku timid bogga ama goobta internet-ku waa inay si dhakhso ah ula socodsiiyaan dugsigooda iyagoon cid kale tusin.
Waalidku waa inayna furaha ay ku galaan qof kale siin, xataa carruurtooda.
Waalidku waa inayna kombiyuutarka geyn hab uu iskii isu daarayo kuna galayo goobtan dugsiyada fure la'aan.
Waalidka loo maleeyo inay khatar ku yihiin habkan waa laga xiri doonaa.

F) Waxyaalaha lagu Xafidayo Booggan Ardayda waxa ka mid ah:

1- Waxa laga galayaa goob internet oo la xafiday. Dadka furaha la siiyey iyagaa ka mas'uul ah inayna qof kale siin iyo inay si ku habboon u xafidaan isla markaana googooyaan ama si fiican u baabi'iyaan wixii dukumenti ah ee goobtan laga soo daabaco.
2- Haddii aad saddex jeer oo isku xigta furaha garan weydo, waxaa kaa xirmaya bogga oo dhan mana furi kartid ilaa laga hubsado inaad tahay qofkii saxda ahaa ee la siiyey. Si uu qofku mar danbe u isticmaalo waa inuu dugsiga u soo diro email. Qoyska ay ilmo u dhigtaan dugsiyo kala duwan, waxay u baahan yihiin inay emailka u diraan hal dugsi oo kaliya.
3- Haddii qofku ka tago kombiyuutarka oo furan in muddo ah, si iskii ah ayuu boggani isu xirayaa
4- Waalidka marka ay ilmihiisa oo dhani qalin jabiyaan, ay dugsiga ka baxaan, ama maxkamadi ka qaaddo mas'uuliyadda carruurta waxa laga xiri doonaa bogga ardayga.

G) Koobnaanta Ma'uuliyadda Dugsiga

Dugsiyadu waxay isticmaali doonaan wixii dadaal ah ee macquul ah si xogta ardayda ay uga ilaaliyaan inay fiirsadaan dad aan loo ogalayni. Dugsigu mas'uul kama aha wixii dhaqaale ah ee qofka kaga yimaadda haddii qof aan loo ogolayn si sharci darro ah u isticmaalo boggan. Ma jiraan heerar kala duwan oo ah waxay ka arki karaan boggan. Dugsiguna mas'uul kama aha falalka waalidku ku gaco ee dayici kara xogta ardaygooda. Dugsigu wuxuu xaddidi karaa in la fiiriyo xogta ardayga isagoon ogeysiis horey u sii bixin Dhamaan waalidka isticmaalaya boggan waxaa loo aqoonsanayaa inay ogolaadeen in la kormeerayo hawlaha ay ku fulinayaan iyo in boggan uu yahay goob khaas ah oo maamulka waxbarashadu ugu talalgalay in lagu hormariyo waxbarashada. Waxyaalaha lagu dhex suubinayo waxa loo duubayaa si elektaroonik ah.

H) Sida loo Helo Taageero

Fadlan akhri haddii uu kuu geli waayo furahaagu. In laguu furaa waxay qaadan kartaa dhowr cisho.
Waalidku waa inay codsadaan in loo furo iyagoo email u diraya dugsiga ilmahoodu dhigtaan. Haddii ilmo kuu dhigtaan hal dugsi wax ka badan, waxad u baahan tahay hal dugsi o kaliya.
Si loo hubsado in emailku sax yahay, waa in emailku la mid yahay ka dugsigu kaa hayo
Marka hubsado in qofka in loo furo boggani uu sax yahay , dugsigu dib ayuu u furi doonaa.

Dugiyada Dadweynaha ee Portland

Infinite Campus Parent/Guardian Portal Access Request Form
(Foomka codsiga helitaanka furaha waalidka ee Infinite Campus)

Dugsiyada Portland waxay ku siin karaan xogta ardayga adigoo u maraya bogga internetka. Si loo ilaaliyo qarsoodiga xogta ardayga, dhamaan waalidka u baahan inay isticmaalaan boggan waxa laga doonayaa inay saxeexaan foomkan kuna soo daraan foomamka la soo diro marka dugsiga la furo, iyagoo ku soo celinaya mid ka mid ah dugsiyada ilmuhu dhigtaan.
Fiiro gaar ah:- Haddii aad foomamkan u saxeexdo ilmahaaga mid kamid ha, waxay fursad kuu siin doontaa inaad la socoto ilmahaaga oo dhan ee ku jira dhamaan dugsiyada Portland.

Hadii aad hada heysato furaha aad ku gali karto Fadlan Iska daa warbaxintaan

FADLAN KU QOR FAR KALA BAXSAN
Magaca waalidka *(hal magac oo waalid oo kaliya foomkiiba)*
_____
Cinwaanka Guriga:
_____

Cinwaanka emailka : (haddaadan email lahayn, fadla booqo dugsiga)
_____

Waxaan caddaynayaa in dhamaan warbixinta kor ku qoran ay dhab tahay oo aan sharci u leeyahay inaan arko xogta waxbarasho ee ilmahayga
Saxeex:_____ Taariikh: _____
Saxeexa waalidka *(ss/mmd/ssss)*

Muhiim– Marka la xaqiijiyo warbixinta sare ku qoran, waxa lagu siin doonaa furaha koobaad eed ku gasho bogga *Infinite Campus* oo laguugu soo diri doono emailka, Waxaa kale oo warkan aad ka heli kartaa: http://www2.portlandschools.org/parents

Office Use Only:
Date Returned: _____ ☐ Verified Email Address ☐ Verified Home Address
☐ GUID Emailed ☐ GUID given by hand